

AKHRI • HADAL • HEES • QOR • CIYAAR

## Qoyska Sharafta Leh,

Laga bilaabo tariiqda \_\_\_\_\_, ilmahaagu waxa uu guriga keeni doonaa boorso buug madaw ah oo ay ka buuxaan afar buug oo cajiib ah si uu qoyskaaga uga raaxaysto toddobaad kasta. Ma jirto wax kharash ah oo lagaaga doonayo ama ganaax daahid. Waxa uu qayb ka yahay barnaamijka Multnomah County Library's **Every Child A Reader**. \_\_\_\_\_ ayaa ah maalinta lasoo celinayo boorsada buugaagta. Fadlan ka caawi ilmahaaga inuu soo celiyo bushqadda buugga oo ay ku jiraan afarta buug maalintaa. Ilmo kastaa waxa la siin doonaa boorso kale oo afar buug oo kale ku jiraan si uu guriga ugu qaado \_\_\_\_\_.

## Maalin kasta la akhri buugaagta ilmahaaga.

- U dejinta wakhti gaar ah, xataa 10 daqiiqo, waxey ledahay faido qaab wanaagsan oo ilmahaaga aad ugaga caawinayso inuu hormariyo xirfadahiisa uu u baahanayo marka la gaaro wakhtigii wax akhriska.
- U samee saacadda go'an oo seexashada, nasashada, iyo wakhti gaar ah oo qoysku uu isku imanayo.

## Ma jirto qaab khaldan oo buug loola akhriyo ilmahaaga.

- Ka sheekee sawirada, akhri kaliya dhawr bog, ama ka bilaw xagga danbe buugga. Laakiin haddiiba aad rabto inaad buug ilmahaaga la wadaago waa wax aad u faido weyn.
- Ka sheekee oo su'aalo ka waydii sheekada.
- Wakhti uu kaga jawaabo ama uu kaga warbixiyo sheekada sii ilmahaaga.

## Ku celceli akhriska buug kasta.

- Waxay bartaan wax cusub mar kasta oo ay dib u maqlaan sheekada.
- Waxay ka dhigan tahay wadaagista buugga uu jecel yahay ilmahaagu idinka oo isku dhan.
- Fikrada ayaa soo noqda mar kasta oo aad la wadaagto buugga.

## Waxaa sii dheer, inay madadaalo idiin tahay.

- Qosol, ciyaar, matal waxyaabaha sheekadu ku socoto codkooda, heestooda, iyo wixii la mid ah. Maskaxda carruurta waxay soo jeeddaa marka laga qaybgaliyo arrimaha.
- Marka aad wada madadaaloonaysaan idinka oo wada jir ah, waxaa kordhaya muuqaalka uu ilmahaagu sawiranayo waxaanu doonaa inuu wax badan ka ogaado caalamka.

Hawlahani waxay dhisan xirfadaha akhriska ilmahaaga uu ugu baahanayo guusha dugsiga. Ilmahaagu waxa uu yeelanayaa bilaw wanaagsan oo caalamka akhriska ah iyo waxbarasho nolosha oo dhan ah!